Marka ay hawada xumaataa dhacdo, halkan waxaa ku qoran sida aad kuu siino macluumaadka cusub.

Saadaasha hawada masaafadda dheer oo loogu talagalay Portland waxay saadaalinaysaa jiilaal fudud, laakiin haddii aad Portland ku noolayd wakhti aad u dheer, waxaad garanaysa in saadaashu noqon karto, aan iraahdo, mid aan la hubin. Haddii aad leedahay arday dhigata Dugsiyada Dadweynaha Portland, fadlan ogow siyaabaha aan kuugu wargelino marka ay jirto saadaasha hawada oo la xiriirta xiritaanada iyo dib u dhacyada dugsiga.

Waxaa jira saddex siyaabood aan u farriimaha ugu dirno qoysaska oo ku saabsan dib u dhacyada, xiritaanada iyo go'aanada kala ee la xiriira dhanka cimilada:

- **Wicitaanka telefoonada:** Wicitaanada telefoonka oo toos ah, oo ah dhammaan luqaddaha la taageero (Isbaanish Vietnamese, Chinese, Russian iyo Soomaali), ayaa la sameyn doonaa iyada oo loo diri doono lambarka muhiimka ee ku qoran diiwaanka ardayda kasta. Haddii aad dhawaan bedeshay lambarkaaga, fadlan ka cusbooneysii dugsigaaga.
- **Email-ka:** Fariin toos ah ayaa loo diri doonaa cinwaanka email-ka ee ku jiran diiwaanka ilmahaaga. Farriintan waxaa loo turjumi doonaa shan luqaddood oo la taageero.
- **Farriinta dhanka telefoonka:** Waxaad farriin ku heli doontaa telefoonkaaga gacanta, balse waa in aad marka hore doorataa nidaamka Fariin Qaadaha Dugsiga 'SchoolMessenger' adiga oo farriin ku diraya "Yes" ama kaliya "Y" unu diraya 68453. Ogow: Haddii aad doorato, waxaad heli doontaa wicitaan toos ah 'auto-dialer'.

Waxaan sidoo kale macluumaadka cusub soo gelinaa internet-ka:

- **Twitter:** La soco koontadeena, @PPSConnect.
- **Facebook:** Aan isku xirnaano www.facebook.com/pps.homepage.
- **Website-kayaga:** Booqo pps.net oo raadi meesha wax laga sii gelayo ee jaalaha ah ee ku taala dhinaca sare ee bogga hore ee internet-ka. Halkaasi waa meesha aad ka heli dooni macluumaad faahfaahsan oo dheeraad ah, sida waddooyinka barafka ee loogu talagalay basaska. Farriimaha waa la turjumi doonaa.